

Waa maxay sababta ay tahay inaan haatan u qaato tallaalka korona?

Xanuunka feyruska korona (Covid-19) waxaa uu noqon karaa mid isbedbeddela oo aad u daran oo waliba aan wax astaan ah lahayn, waxaana dhici karta in uu qofka ku noqdo xanuun aad u daran oo uu baahda in la dhigo qaybta gargaarka degedegga ah ee isbitaalka, mararka qaarkoodna waxaaba dhici karta in uu u dhinto. Qaar ka mid ah dadka uu ku dhacay xanuunka, waxaa dhici karta in uu ku reebo xanuunno muddo aad u dheer socda, sida daal, adkaanta neefsashada, qufac iyo xanuun muddo dheer socda oo kaga dhaca kalaggoosyada jirka iyo xabadka.

Tallaalka feyruska korona waxaa uu si aad ah oo muuqata u yaraynayaa cudur qaadista iyo khatarta ah in uu qofku sii fidiyo, sidoo kale waxaa u si aad iyo aad ah u yaraynayaa khatarta ah in uu qofka ku dhaco xanuunka aadka u daran ee feyruska korona. Sababtaas awgeed ayaa qaadashada tallaalku waxaa ay badbaado u tahay dadka ehelkaaga ah, kuwaasoo tusaale ahaan aan lahayn difaac ku filan oo ay isaga kaa ilaaliyaan, xanuunka aadka u daran ee haya awgeed, taa macnaheedu waxaa weeye in qaadashada tallaalka aad naftaada kasokow ku ilaalinayso tan dadka kale. Tallaalka kama qaadaysid cudurka feyruska korona.

Si loo gaaro hadafka ah in la helo badbaado dhanka tallaalka ah oo dadka ku filan, waa in qof kastaa uu qaato qaybaha tallaalka ee la soo jeediyay oo dhan.

Tallaalka waa mid adiga bilaash ama lacag la'aan kuu ah. Qaadashada tallaalka xilligaan hatan ah waa mid aad muhiim u ah.

Waxaad ballanka tallaalka ka qabsan kartaa bogga internetka ee ah <https://paijat-sote.fi/ajanvaraus-ja-tietoa-koronarokotuksista/> , ama waxaad tagi kartaa goobaha tallaalka ee aan u baahnayn in ballanka hore looga sii qabsado ee loo yaqaan (pop up rokotuspiste).